FEDERAL REPUBLIC OF SOMALIA
MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND ECONOMIC DEVELOPMENT

WASAARADDA QORSHEYNTA MAALGASHIGA &
HORUMARINTA DHAQAALAHA

وزارة التخطيط والاستثمار والتنمية الاقتصادية

MINISTRY OF PLANNING, INVESTMENT AND
ECONOMIC DEVELOPMENT

# WARBIXINTA BILLAHA

## DISEEMBAR 2025




mop.gov.so

## HORDHAC

Warbixintan Billaha ah ee Diseembar 2025 waxay si guud u soo bandhigaysaa hawlaha, kulamada istiraatijiga ah, iyo horumarrada muhiimka ah ee ay Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga, iyo Horumarinta Dhaqaalaha ka hirgelisay heer qaran iyo heer dowlad-goboleed intii lagu guda jiray bisha Diseembar.

Warbixintu waxay iftiiminaysaa dadaallada wasaaraddu ku hoggaaminayso isku-duwidda qorsheynta horumarineed, hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), xoojinta iskaashiga caalamiga ah, iyo horumarinta nidaamyada kormeerka, qiimaynta, iyo isla-xisaabtanka.

Bishan Diseembar, Wasaaraddu waxay si gaar ah diiradda u saartay xoojinta wada-shaqeynta Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah, la-tashiyada Qorshaha Iskaashiga Horumarineed ee Qaramada Midoobay (UNCF 2026–2030), dhisidda awoodda hay'adaha dowliga ah, iyo hoggaaminta dadaallada wax ka qabashada xaaladaha degdegga ah sida abaaraha.

Warbixintani waxay si buuxda u muujinaysaa jihada istiraatijiyadeed ee Wasaaradda, natiijooyinka la gaaray, iyo tallaabooyinka xiga ee lagu dardargelinayo horumar waara oo ku saleysan baahiyaha bulshada Soomaaliyeed.

# WASIIRKA QORSHEYNTA IYO ISKUDUWAHA ARRIMAHA HORUMARINTA IYO BANI'AADAMNIMADA OO KULAN MUHIIM AH KU YEESHAY



**Muqdisho, 27-ka Diseembar 2025** - Wasiirka Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa kulan muhiim ah la qaatay Ku-xigeenka Wakiilka Qaramada Midoobay ee Soomaaliya, ahna Isku-duwaha Arrimaha Horumarinta iyo Bani'aadamnimada, Mudane George Conway, iyagoo ka wada hadlay arrimo la xiriira hirgelinta iyo hanaanka iskaashiga horumarineed ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya.

Kulanka ayaa diiradda lagu saaray dhammeystirka habka iskaashiga horumarineed ee Qaramada Midoobey ee Soomaaliya (UN Cooperation Framework), oo haatan sugaya ansixinta Golaha Wasiirrada. Waxa kale oo laga wada hadlay Xoojinta adeegsiga nidaamyada maaliyadeed ee dalka (country systems) ee fulinta mashaariicda iyo barnaamijyada horumarineed si loo taageero hay'adaha qaranka iyo kobcinta awooddooda shaqo.

Sidoo kale, labada dhinac ayaa falanqeeyay marxaladda kala-guurka ee Xafiiska Siyaasadda ee Qaramada Midoobey ee loo soo gaabiyo UNTMIS iyo saameynta ay ku leedahay isku-duwidda qorshayaasha horumarinta dalka iyo hannaanka wada-shaqeynta hay'adaha kala duwan ee dowladda iyo Qaramada Midoobay.

Intaa waxaa dheer, kulanka ayaa dib loogu milicsaday guulaha waaweyn ee la gaaray sannadka 2025, oo ay ka mid yihiin: Daah-furka Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP), Heerarkii ugu dambeeyay ee UNCF oo ku dhow gabagabo iyo Isku-duwid iyo wada-shaqeyn xooggan oo ka dhex abuurantay Sanduuqa Wadajirka ee Soomaaliya (Somalia Joint Fund) iyo hannaanka iskuduwidda deeqaha.

Labada dhinac ayaa ku heshiiyay in la xoojiyo iskaashiga, wada-shaqeynta, iyo isku-duwidda mudnaanta horumarineed ee sannadka cusub ee 2026, si loo horumariyo natiijooyinka horumarineed ee dalka iyo guulaha laga gaaray qorshayaasha dowlad-dhiska iyo horumarinta dhaqaalaha.

# KULAMADII WADATASHIGA EE HANNAANKA WADASHAQEYNTA TIIRARKA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA (QIQ) OO LASOO GABAGABEEYAY



**Muqdisho, 24-ka Diseembar 2025** - Wasiirka Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), ayaa si rasmi ah u soo xiray kulamadii wadatashiga ee hannaanka wadashaqeynta tiirarka Qorshaha Isbeddelka Qaranka (QIQ), kuwaas oo socday muddo afar maalmood ah (21–24 December 2025) laguna qabtay magaalada Muqdisho.

Kulamadan oo ay soo qabanqaabisay Waaxda Iskuduwidda Deeqaha ee wasaaradda, ayaa waxaa ka qaybgalay hay'adaha Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo mas'uuliyiin matalayay ganacsiga gaarka loo leeyahay. Maalintii ugu dambeysay ee kulamada ayaa si gaar ah diiradda loogu saaray Tiirka Afaraad ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka, kaas oo ku saabsan Deegaanka iyo Adkeysiga Isbeddelka Cimilada.

Intii uu socday kulanka, waxaa si qoto dheer loogu falanqeeyey tallaabooyinka wax ku oolka ah ee looga hortagi karo khatararaha isbeddelka cimilada, iyadoo xoogga la saaray siyaasadaha, maalgelinta, nidaamyada digniinta hore, iyo ka-qaybgalka ganacsiga gaarka ah. Doodaha ayaa si gaar ah u taabtay fursadaha la xiriira tamarta la cusboonaysiin karo, maaraynta qashinka, biyaha, ka-hortagga fatahaadaha, iyo maalgelinta barnaamijyada la xiriira deegaanka iyo cimilada, kuwaas oo ah meelaha mudnaanta leh ee Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

Kulamadii wadatashiga ayaa ku soo dhammaaday ballan-qaad wadajir ah oo ku aaddan xoojinta iskaashiga joogtada ah ee u dhexeeya dowladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si loo dardar-geliyo hirgelinta yoolalka Qorshaha Isbeddelka Qaranka, loona xaqiijiyo horumar waara oo u adkaysi leh saameynta isbeddelka cimilada.

## TABABAR LAGU XOOJINAYAY AQOONTA IYO XIRFADAHA KORMEERKA IYO QIIMAYNTA (M&E) OO LA SOO GABAGABEEYAY.



**Muqdisho, 13-ka Diseembar 2025** - Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorshaynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa si guul leh u soo gabagabeysay tababar shan (5) maalmood socday oo lagu xoojinayay aqoonta iyo xirfadaha Kormeerka iyo Qiimaynta (M&E). Tababarku wuxuu isu keenay ka-qaybgalayaal ka kala socday hay'adaha dawladda, ururrada bulshada rayidka ah, iyo jaamacadaha, si kor loogu qaado tayada dabagalka, qiimaynta, iyo natiijo-ku-saleynta barnaamijyada horumarineed.

Intii uu socday tababarku, ka-qaybgalayaashu waxay heleen tababarro wax-ku-ool ah oo ay bixinayeen khubaro M&E ah, kuwaas oo diiradda saarayay cabbirka natiijooyinka, isticmaalka xogta go'aan-qaadashada, iyo kor u qaadista hufnaanta fulinta mashaariicda. Ka-qaybgalayaashu waxay caddeeyeen in aqoonta ay heleen ay si toos ah u xoojin doonto wax-qabadkooda shaqo.

Munaasabadda xiritaanka waxaa ka hadlay Madaxa Mashaariicda UNDP Soomaaliya Marwo Shella Khaan, Maareeyaha Mashruuca Horumarinta Maamul-wanaagga Dawladnimada Mudane Cabdirisaaq Xirsi, Guddoomiyaha Ururka Qiimaynta Soomaaliya (SOMES) Mudane Maxamuud Nuur, iyo Agaasimaha Shirkadda Galayr Consultants Mudane Faarax. Dhammaantood waxay bogaadiyeen muhiimadda tababarkani u leeyahay kobcinta aqoonta shaqaalaha dawladda, iyagoo muujiyay sida ay uga go'an tahay sii wadidda taageerada dadaallada noocan ah.

Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta, Mudane Maxamuud Siciid Nuur, ayaa xaqiijiyay in Waaxdu sii wadi doonto tababarro joogto ah si loo hubiyo in barnaamijyada horumarineed ay keenaan natiijooyin la taaban karo oo waara.

# SHIR WADATASHIYA OO LA XIRIIRA QAABAYNTA QULQULKA DEEQAHA AAN MIISAANIYADDA DALKA KU JIRIN (OFF-BUDGET AID-FLOW CONSULTATION MEETING)




**Muqdisho, 13-ka Diseembar 2025** - Waaxda Iskuduwidda Deeqaha ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya ayaa magaalada Muqdisho ku qabatay Shir Wadatashi ah oo la xiriira qaabaynta qulqulka deeqaha aan miisaaniyadda dalka soo marin (Off-Budget Aid-flow Consultation Meeting).

Shirka waxaa ka qaybgalay khubaro iyo mas'uuliyiin ka socday Wasaaradda Maaliyadda, Xafiiska Hanti-dhowrka Guud, iyo hay'ado kale oo dowladeed. Kulanka ayaa diiradda lagu saaray sidii loo horumarin lahaa habraacyada la-socodka, isku-duwidda, iyo daahfurnaan-ta qulqulka deeqaha dalka soo gala ee aan ku jirin miisaaniyadda qaranka.

Kulanka waxaa furay Agaasimaha Waaxda Iskuduwidda Deeqaha, Mudane Cabdifataax Cismaan Xasan (Gaandi), oo hoosta ka xariiqay muhiimadda ay leedahay in la helo nidaam mideysan oo lagu maareeyo deeqaha si loo xoojiyo isla-xisaabtanka iyo waxtarka taageerada caalamiga ah.

# SOOMAALIYA OO ANSIXISAY SIYAASADDA CUSUB EE KORMEERKA IYO QIIMAYNTA EE BULSHADA BARIGA AFRIKA



Muqdisho, 11-ka Diseembar 2025 - Dowladda Federaalka Soomaaliya ayaa ka mid noqotay dalalka Bulshada Bariga Afrika ee oggolaaday siyaasadda cusub ee Kormeerka iyo Qiimaynta iyo qaab-dhismeedka natiijo-ku-saleysan, intii uu socday shir saddex maalmood ah oo lagu qabtay magaalada Nairobi.

Maxamuud Siciid Nuur, Agaasimaha Waaxda Kormeerka iyo Qiimaynta ee Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha, ayaa Soomaaliya ku matalay shirka oo ay isugu yimaadeen mas'uuliyiin sare iyo khubaro ka kala socday dalalka Bariga Afrika. Kulanka waxaa lagu soo bandhigay siyaasadda cusub iyo qaab-dhismeedka hirgelinteeda, iyadoo si gaar ah diiradda loo saaray sidii loo xoojin lahaa nidaamyada Kormeerka iyo Qiimaynta ee dalalka gobolka.

Soomaaliya waxay shirka ka muujisay ka-qaybgal firfircoon, iyadoo la wadaagtay horumarrada la gaaray iyo hababka xog-ku-salaysan ee ay u adeegsatay Kormeerka iyo Qiimaynta. Mas'uuliyiinta ka socday dalalka kale ayaa tilmaamay in doodaha Soomaaliya ay soo kordhiyeen aragtiyo waxtar leh oo ku saabsan dhismaha nidaamyo taageera go'aan qaadasho hufan.

Siyaasadda cusub waxay dejinaysaa hab mideysan oo kor u qaadaya isla-xisaabtanka, hufnaanta, iyo dabagalka waxqabadka adeegyada bulshada iyo dhaqaalaha. Waxay sidoo kale xoojinaysaa iskaashiga hay'adaha heer qaran iyo heer gobol.

Dalalka xubnaha ka ah Bulshada Bariga Afrika ayaa si aqlabiyad leh u ansixiyay siyaasadda iyo qaab-dhismeedka, iyagoo ku heshiiyay in loo gudbiyo Golaha Wasiirrada si ay u meel mariyaan – tallaabo loo arko mid horumar u ah isku-dubaridka nidaamyada Kormeerka iyo Qiimaynta ee gobolka.

# AQOON-ISWEYDAARSI LAGU XOOJINAYO ISKU-DUWIDDA MASHAARIICDA HORUMARINTA IYO TAAGEERIDDA BULSHOOYINKA NUGUL EE GALMUDUG OO LA SOO GABAGABEEYAY



**Dhuusamareeb, 11-ka Diseembar 2025** – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo kaashaneysa Wasaaradda Qorsheynta ee Galmudug, ayaa ku soo gabagabeysay magaalada Dhuusamareeb aqoon-isweydaarsi shan maalmood socday oo looga hadlay xoojinta isku-dubbaridka mashaariicda horumarinta iyo taageeridda bulshooyinka nugul ee Galmudug.

Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Galmudug, Cabdiraxmaan Xayle, ayaa si rasmi ah u soo xiray kulanka, wuxuuna uga mahadceliyay ka-qaybgaleyaasha dooda iyo falanqaynta socotay 5 maalmood oo muujisay caqabadaha daran ee heysta bulshada, gaar ahaan kuwa ay abaaruhu si joogto ah u saameeyaan.

Aqoon-isweydaarsiga ayaa waxaa ka qeyb galay kooxaha farsamada ee labada wasaaradood si ay u qiimeeyaan baahiyaha jira, u falanqeeyaan caqabadaha adeegyada bulshada, isla markaana u waafajiyaan qorsheynta Dowlad-Goboleedka iyo hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka. Cabdullaahi Cabdi Nuur-Duqow, Madaxa Barnaamijyada iyo Mashaariicda ee Wasaaradda Qorsheynta DFS, ayaa ka hadlay munaasibadda xiritaanka, isagoo adkeeyay baahida loo qabo qorshe mideysan iyo fulin wadajir ah.

Mas'uuliyiintu waxay sheegeen in kulanka ay ka soo baxeen talooyin wax-ku-ool ah iyo mudnaan muhiim ah oo lagu horumarinayo adeegyada bulshada, laguna taageerayo dadka nugul. Waxaana lagu tilmaamay natiijooyinka in ay gacan ka geysan doonaan dardargelinta qorsheyaasha horumarineed ee Galmudug iyo guud ahaan dalka.

# DOWLADDA IYO GANACSATADA OO WADAJIR U DARDARGELINAYA FULINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA



Muqdisho, 10 Disembar 2025 – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa magaalada Muqdisho ku martigelisay kulan muhiim ah oo ay isugu yimaadeen hoggaanka shirkadaha Soomaaliya iyo maalgashatada caalamiga ah ee dalka ka hawlgala.

In ka badan 100 ganacsato, maalgashato, saraakiil dowladeed iyo diblomaasiyiin ayaa ka qeyb galay kulanka, oo diiradda lagu saaray: dardargelinta wadahadallada ku saabsan horumarinta dhaqaalaha, kordhinta wacyiga ganacsatada ee ku aaddan qaybaha dhaqaalaha ee mudnaanta leh, sii xoojinta fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo horumarinta iskaashiga ganacsatada gudaha iyo kuwa caalamiga ah.

Waxaa ka hadlay Agaasimaha SOMINVEST Mudane Maxamed Dhubow, oo sheegay in Qorshaha Isbeddelka Qaranka uu yahay isbeddel qaran oo u baahan maalgelin iyo wada-shaqeyn dhow oo lala yeesho ganacsatada Soomaaliyeed iyo kuwa caalamiga ah. Sidoo kale, wuxuu tilmaamay in Wasaaraddu diyaarineyso daabacaadda 2-aad ee Istaraatiijiyadda Qaran ee Dhiirrigelinta Maalgashiga iyo siyaasadaha la xiriira hagaajinta jawiga maalgashiga.

Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), oo kulanka soo xiray, ayaa hoosta ka xarriiqay in kororka maalgashiga shisheeye ee dalka uu caddeyn u yahay in jawiga maalgashigu soo hagaagayo, isla markaana isbeddellada dowladda ay miro-dhalayaan. Wuxuu ku baaqay in ganacsatada gudaha iyo dibaduba ay si dhow ula shaqeeyaan Wasaaradda si loo dar-dargeliyo fulinta NTP, loona gaaro horumar dhaqaale oo waara oo loo dhan yahay.

# MAS'UULIYIIN KA SOCDAY WASAARADDA QORSHEYNTA OO DHAMEYSTAY AQOON-KORORSI HEER SARE AH OO KU SAABSAN SIYAASADAHA DHAQAALAHA IYO HIRGELINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA, KANA QABSOOMAY MALAYSIA



**Muqdisho, 7-da Diseeembar 2025** - Agaasimaha Guud ee Wasaaradda Qorsheynta, Mudane Maxamed Shire, iyo Agaasimaha Waaxda Kormeerka & Qiimaynta, Maxamuud Siciid Nuur, ayaa qayb ka ahaa wafdi ka socday Dowladda Federaalka iyo Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka oo soo dhameystay aqoon kororsi heer sare ah oo ku saabsanaa Falanqaynta Siyaasadaha Dhaqaalaha iyo Hoggaaminta Hirgelinta Isbeddelka, kaas oo lagu qabtay Kuala Lumpur, Malaysia (28 Nov – 6 Dec 2025).

Tababarkan ayaa diiradda lagu saaray hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029), kobcinta dhaqaalaha, dib-u-habaynta maaliyadda, kordhinta dakhliga gudaha, tayeynta shaqaalaha, iyo xoojinta kormeerka & qiimaynta barnaamijyada.

Intii ay joogeen Malaysia, wafdigu waxay booqdeen Wasaaradaha Maaliyadda iyo Dhaqaalaha, halkaas oo ay ku bartaan habraacyada qorsheynta qaranka, diyaargarowga miisaaniyadda, iyo nidaamyada Kormeerka iyo Qiimaynta. Sidoo kale, Wasiirkii hore ee Horumarinta Dhaqaalaha Malaysia, Mustapa Mohamed, ayaa la wadaagay waayo-aragnimo iyo talooyin istiraatiji ah oo muhiim u ah horumarinta Soomaaliya.

Aqoon kororsiga wuxuu sare u qaadayaa xirfadaha hay'adaha dowladda, isagoo xoojinaya hufnaanta, isla xisaabtanka, iyo kobaca dhaqaalaha ee waara.

# AQOON-IS-WEYDAARSI WADIIQOOYINKA XALALKA WAARA LAGU WAAFAJINAYO HIRGELINTA QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA (NTP 2025–2029) OO LA DAAHFURAY



Baydhabo, 7-da Diseeembar 2025 - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ee Xukuumadda Federaalka Soomaaliya, iyadoo kaashaneysa Wasaaradda Qorsheynta Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed, ayaa magaalada Baydhabo ka daahfurtay aqoon-isweydaarsi socon doona muddo 5 maalmood ah, kaas oo diiradda lagu saarayo hirgelinta Wadiiqooyinka Xalalka Waara iyo waafajinta Qorshaha Isbeddelka Qaran (NTP 2025–2029).

Kulanka waxaa si rasmi ah u furay Wasiir ku-xigeenka Wasaaradda Qorsheynta Koonfur Galbeed, Mudane Maxamed Nuur Fanax, oo hoosta ka xarriiqay muhiimadda uu wadatashigan u leeyahay qorsheynta horumarineed ee Dowlad-Goboleedka Koonfur Galbeed.

Sidoo kale, Agaasimaha Waaxda Qorsheynta Qaranka ee Wasaaradda Qorsheynta Federaalka, Mudane Maxamed Weli Axmed, ayaa soo bandhigay ujeeddooyinka aqoon-isweydaarsiga iyo natiijooyinka laga filayo, isagoo xusay muhiimadda ay leedahay in la mideeyo qorshayaasha, habraacyada iyo hannaanka lagu hirgelinayo xalalka waara ee dadka iyo bulshada.

Aqoon-isweydaarsigan ayaa qayb ka ah dadaallada lagu xoojinayo isku-xirnaanta, qorsheynta wadajirka ah, iyo dhisidda awoodda hay'adaha dowliga ah, si loo xaqiijiyo horumar waara oo ku saleysan baahiyaha bulshada.

# KULANKA WADATASHIGA EE MASHAARIICDA KAABAYAASHA DHAQAALAHA & ISKAASHIGA PPP



**Muqdisho, 7-da Diseembar 2025** - Waaxda Horumarinta Dhaqaalaha ee Wasaaradda Qorsheynta ayaa Muqdisho ku qabatay kulan wadatashi oo lagu soo bandhigay mashaariicda kaabayaasha dhaqaalaha ee dowladda iyo fursadaha lagu hirgelin karo Iskaashiga Dowladda & Ganacsiga Gaarka ah (PPP).

Kulanka wuxuu diiradda saaray: xoojinta awoodda hay'adaha dowladda, hagaajinta nidaamka sharciga ee PPP, iyo qeexidda mashaariicda mudnaanta leh ee maalgashiga waara.

Kulanka waxaa si rasmi ah u furay Ku-simaha Agaasimaha Guud, Mudane Aadan Qaasim Maxamuud, halka Agaasimaha Waaxda Horumarinta Qaranka, Dr. Cabdinaasir Cumar Kaatib, uu sharaxaad ka bixiyay ujeeddooyinka iyo muhiimadda kulanka. Mas'uuliyiin ka kala socday dowladda, ganacsiga gaarka loo leeyahay, iyo aqoonyahan ayaa sidoo kale ka dhiibtay aragtiyadooda ku saabsan dardargelinta iskaashiga PPP.

Ka qaybgalayaasha ayaa loo kala qaybiyay afar kooxood oo falanqeeyay arrimaha aasaasiga u ah hirgelinta PPP-ga, waxaana natiijooyinkooda looga faa'iidaysan doonaa diyaarinta Istaraatiijiyadda Qaranka ee PPP.

Wasaaradda Qorsheynta waxay adkaynaysaa inay ka go'an tahay dhismaha jawi wada-shaqeyn oo wax ku ool ah oo ka dhexeeya dowladda iyo ganacsiga gaarka loo leeyahay, si loo horumariyo kaabayaasha dhaqaalaha iyo kobaca dhaqaalaha dalka.

## KULANKA GOLAHA HORUMARINTA QARANKA OO MUQDISHO LAGU QABTAY




Muqdisho, 4ta Diseembar 2025 – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa magaalada Muqdisho ku martigelisay kulan wadatashi ah oo ay isugu yimaadeen Golaha Horumarinta Qaranka, kaas oo ay ku mideysan yihiin Wasiirka Qorsheynta Dowladda Federaalka Soomaaliya iyo Wasiirrada Qorsheynta ee Dowladaha Xubnaha ka ah Dowladda Federaalka.

Kulanka oo lagu qabtay magaalada Muqdisho ayaa diiradda lagu saaray dar-dargelinta hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (QIQ 2025–2029), xoojinta wada-shaqeynta hay'adaha heer federaal iyo heer dowlad-goboleed, gurmadka abaaraha uu dalku wajahayo, iyo sidii loo mideyn lahaa qorsheynta horumarineed ee dalka oo dhan.

Kulanka waxaa si rasmi ah u furay Wasiirka Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene), isaga oo ka hadlay muhiimadda dhismaha nidaam mideysan oo hagaya qorsheynta qaranka, iyo dardargelinta fulinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka (QIQ 2025–2029).

Intii uu kulanku socday, waxaa khudbado ka jeediyay qaar ka mid ah Wasiirrada Dowlad-Goboleedyada oo ay ka mid yihiin:

- Mudane Cali Warsame – Wasiirka Qorsheynta Waqooyi Bari
- Mudane Maxamuud Cabdi Cali – Wasiirka Qorsheynta Hirshabelle
- Mudane Cabdiraxmaan Axmed Xayle– Wasiirka Qorsheynta Galmudug
- Mudane Maxamed Nuur Fanax – Wasiir Ku-xigeenka Qorsheynta Koonfur-Galbeed

Sidoo kale, waxaa lagu soo bandhigay warbixinta natiijooyinka Qiimeynta Muddo-Dhammaadka Qorshaha 9-aad ee Horumarinta Qaranka (QHQ 2020–2024), iyo dulmar ku saabsan hirgelinta Qorshaha Isbeddelka Qaranka, oo ay soo diyaariyeen waaxyaha kala duwan ee Wasaaradda Qorsheynta. Dowladaha xubnaha ka ah Dowladda Federaalka ah waxay soo gudbiyeen warbixinno horumarineed, iyagoo xusay fursadaha, caqabadaha, iyo mudnaanta sannadka soo socda.

Wasiirka Qorsheynta ayaa soo gabagabeeyay kulanka isaga oo xusay in Wasaaraddu ay sii wadi doonto xoojinta wada-shaqeynta federaalka iyo dowladaha xubnaha ka ah dowladda federaalka, si loo xaqiijiyo fulinta QIQ, isla markaana loo gaarsiiyo bulshada Soomaaliyeed horumar waara oo loo baahan yahay.

# WASAARADDA QORSHEYNTA IYO UNRCO OO QABTAY KULAN WADATASHI AH OO LA ISUGU WAAFAJINAYO QORSHAHA ISKAASHIGA HORUMARINEED EE QARAMADA MIDOOBAY (2026–2030) IYO QORSHAHA ISBEDDELKA QARANKA



**Muqdisho, 4ta Diseembar 2025 –** Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha oo kaashanaysa Xafiiska Isku-duwaha Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UNRCO) ayaa qabatay kulan wadatashi muhiim ah oo lagu gorfeeyay Qorshaha Iskaashiga Horumarineed ee Qaramada Midoobay ee Soomaaliya (UN Cooperation Framework 2026–2030).

Kulanka oo ay ka soo qayb galeen wakiillo ka kala socday dowlad-goboleedyada iyo hay'adaha Qaramada Midoobay ayaa waxaa shir-guddoomiyay Agaasimaha Waaxda Qorsheynta Qaranka, Mudane Maxamed Wali Axmed. Ujeedada kulanka ayaa ahayd xoojinta ka-qaybgalka dowlad-goboleedyada si loo hubiyo in ay door muuqda ku yeeshaan dejinta qorshaha cusub ee iskaashiga horumarineed, taas oo la waafajinayo Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029).

Intii uu socday kulankani, waxaa la is-weydaarsaday aragtiyo iyo talooyin muhiim ah oo ku saabsan fursadaha iyo caqabadaha horumarineed ee dalka. Waxaa si gaar ah loo adkeeyay in xogta, cilmi-baarista, iyo caddeymaha la hubo ay yihiin tiirarka ugu muhiimsan ee hagaya siyaasadaha iyo barnaamijyada horumarineed.

Ugu dambayn, kulanka wuxuu ku soo gabagaboobay balanqaad ah in Qorshaha Iskaashiga Horumarineed ee Qaramada Midoobay (2026–2030) uu si buuxda ula jaan qaadi doono mudnaanta qaranka iyo Qorshaha Isbeddelka Qaranka.

## ANSIXINTA HINDISE-QORSHEEDKA DHISMAHA GOLAHA QARANKA EE HORUMARINTA DADWEYNAHA (NCPD)



**Muqdisho, 2-da Diseembar 2025** – Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa Muqdisho ku qabatay kulan wadatashi iyo ansixin isugu jiray oo lagu soo bandhigay Hindise-qorsheedka Dhismaha Golaha Qaranka ee Horumarinta Dadweynaha (NCPD).

Kulankan oo ay ka soo qayb galeen wasaaradaha iyo hay'adaha dowladda ee ka shaqeeya horumarinta bulshada–sida waxbarashada, caafimaadka, arrimaha bulshada, haweenka, tirakoobka, iyo barakaca–ayaa diiradda lagu saaray caqabadaha waaweyn ee bulshada ka jira, oo ay ka mid yihiin kobaca degdegga ah ee dadka, shaqo la'aanta dhallinyarada, adeegyada bulshada oo xadidan, iyo barakaca gudaha.

Ujeeddooyinka NCPD waxaa ka mid ah in la dhiso hay'ad qaran oo awood leh oo hoggaamisa arrimaha dadka iyo horumarinta bulshada, isla markaana hubisa in arrimaha dadka si nidaamsan loogu daro dhammaan qorshayaasha horumarineed ee heer qaran iyo dowlad-goboleed.

Hindisahani waxa uu xooga saaraya xoojinta siyaasadaha iyo go'aan-qaadashada ku saleysan xog sugan, cilmi-baaris iyo xaqiiqooyin la isku halayn karo, iyadoo sidoo kale la ballaarinayo iskaashiga, maalgelinta iyo wada-shaqeynta heer qaran iyo mid caalami ah. Waxa uu taageerayaa waxaa ka mid ah qorshayaasha fog ee dalka sida Qorshaha Isbeddelka Qaranka (NTP 2025–2029) iyo Hiigsiga Qaranka 2060 (CV2060).

Intii kulanku socday, ka qaybgalayaashu waxay soo jeediyeen in la abuuro hannaan mideysan oo lagu maareeyo xogta dadka, in la iswaafajiyo siyaasadaha bulshada ee heer federaal iyo dowlad-goboleed, lana xoojiyo isku-duwidda hay'adaha Dowladda iyo iskaashiga caalamiga ah. Talooyinkan ayaa qayb ka noqonaaya dhismaha hay'ad qaran oo mideysa qorsheynta dadka, kuna shaqeynaya xog cilmi-baaris lagu kalsoonaan karo.

Wasaaraddu waxay caddeysay in talooyinkii iyo aragtiyihii kulanka kasoo baxay lagu dari doono dib-u-eegista kama dambaysta ah ee hindisaha, maadaama NCPD uu muhiim u yahay in Soomaaliya yeelato nidaam mideysan oo lagu horumarinayo dadka, laguna dhisayo adeegyo bulsho oo tayo leh iyo mustaqbal horumar leh.

# WASAARADDA QORSHEYNTA OO QABATAY KULAN LAGU DARDARGELINAYO GURMADKA ABAARAHA DALKA



**Muqdisho, 2-da Diseembar 2025** - Wasaaradda Qorsheynta, Maalgashiga iyo Horumarinta Dhaqaalaha ayaa qabatay kulan muhiim ah oo lagu dardargelinayo gurmadka abaaraha ka jira qeybo badan oo dalka ah. Kulanka waxaa guddoomiyay Wasiirka Wasaaradda, Mudane Maxamuud C. Sheekh Faarax (Beenebeene).

Kulanka oo ka dhacay xarunta Wasaaradda ayaa waxaa ka qeybgalay Guddoomiyaha Hay'adda Maareynta Musiibooyinka Qaranka (SODMA), Mudane Maxamuud Macalin Cabdulle, iyo qaar ka mid ah Agaasimayaasha Waaxyaha Wasaaradda Qorsheynta iyo Hay'adda SODMA.

Shirka waxaa diiradda lagu saaray in si degdeg ah loogu gurmado dadka ay abaartu saameysay, in la mideeyo howlaha gurmadka ee dowladda, in la yareeyo khatarta dhimashada iyo khasaaraha, iyo in la falanqeeyo sababaha abaarta, oo ay ugu weyn tahay roobabkii Gu'ga iyo Dayrta oo aan ka di'in inta badan gobollada.

Kulankan wuxuu daba socday go'aankii Golaha Wasiirrada ee farayay hay'adaha dowladda inay kordhiyaan gurmadka degdega ah. Wasaaradda Qorsheynta ayaa loo xilsaaray hoggaaminta iyo isku-duwidda dadaalladan heer qaran.

Wasiir Beenebeene ayaa ugu baaqay culimada, ganacsatada, bulshada rayidka, iyo qurba-joogta inay qayb ka qaataan gurmadka, iyo In la adkeeyo midnimada iyo isku-duwidda, si loo badbaadiyo dadka iyo duunyada.

Guddoomiyaha SODMA ayaa sheegay in abaartu ay meel aad u daran marayso, iyo in loo baahan yahay gurmad isku dhafan oo mideeya dowladda, bulshada iyo saaxiibada caalamka, si looga hortago in xaaladdu kasii darto.

Wasaaradda Qorsheynta ayaa xaqiijisay in ay sii wadi doonto hoggaaminta qorshaha qaranka ee lagu yareynayo saameynta abaarta, si loo badbaadiyo nolosha shacabka Soomaaliyeed ee ku nool meelaha ay abaaruhu sida daran u taabanayaan.


WASAARADDA QORSHEYNTA
وزارة التخطيط
MINISTRY OF PLANNING



MoPIED